



BPHC, TB Clinic  
BMC Yawkey Bldg, 3<sup>rd</sup> Floor  
850 Harrison Ave.  
Boston, MA 02118  
(617) 534-4875

Dawada Tiibyda

# Levofloxacin

(Levaquin)

## Maxay tahay dawadani?

Levofloxacin (Levaquin) waa kiniin loo isticmaalo daweynta jeermiga tiibayda iyo jeermiyada kale sida kuw keena dhibaatooyinka neefsashada, cudurada kaadi-mareenka iyo cudurada maqaarka.



## Sidee baan u qaataa kiniinkan?

Qaado \_\_\_\_\_ kiniin maalin kasta hal mar mudo ah \_\_\_\_\_ bilood.

- Ha iloobin qaadashada kiniinkan.
- Biyo ku qaado kiniinkan isku wakhti maalin kasta sida laguugu sheegay quraaradda ama dhalada dawada.
- Haddii aad ilowdid inaad qaadatid kiniinka wakhtigii caadiga kuu ahaa, qaado wakhtiga ugu dhakhsaha badan ee aad xusuusatid.
- Ha qaadan laba jeer tirada kiniinka si aad uga daba tagtid intii ku dhaaftay.
- Ha qaadan dawooyinka asiidha ama aashitada caloosha (sida Maalox iyo Mylanta) 2 laba saacadood ka hor iyo 2 saacadood ka dib qaadashada kiniinka.

## U sheeg dhakhtarkaaga/kalkaalisada xarunta haddii:

- Aad uur leedahay, naas-nuujinaysid ama aad ku talo-jirtid inaad uur yeelatid.
- Aad ku talo-jirtid inaad qaadatid dawo ama kiniin kale oo cusub.

## Waxyaabaha la rabo inaad u sheegtid dhakhtarka ama kiliinigga isla markiiba:

Jooji dawada wacna dhakhtarka ama kiliinigga isla markiiba adiga oo wacaya (617) 534- 4875 haddii aad isku aragtid dhibaatooyinka soo socda.

- Finan maqaarka ah ama cuncun
- Cadaadis laabta ama waxa aad dareemi kartaa wadnahaaga oo garaac sameynaya
- Suuxdimo ama dawakhid aad ah
- Kaadi madow ama midabka Kooka-Koola u eeg
- Xanuun muruqa ah oo daran, gaar ahaan gacanta, garabka ama cidhibta
- Isha qaybta cad oo hurdi ama jaale noqotay ama maqaarka oo hurdi ama jaale noqday
- Wax kasta oo aad walwal ka qabtid ama aad u malaynaysid inuu xidhiidh la leeyahay dawada

## Muhiim:

- Dawadani waxay kuu keeni kartaa hurdo-hurdo. Ha wadin baabuur ama ha ku shaqeyn mishiino ilaa aad ka ogaanaysid sida dawadani kaa dhigi doonto.
- Waxa laga yaabaa in dawadani keento inaad dareen badan u yeelatid iftiinka. Gasho dhar badbaado leh, isticmaal labeenta lidka qorraxda iyo muraayadaha qorraxda.

\*\*\*Wac (617) 534-4875 haddii aad qabtid walwal ama su'aalo \*\*\*

La cusbooneysiya 3/05 (SOMALI)